

- Isla 4ta December 2017ka waa qori tuurka isku aadka kooxaha.
- 6da December 2017ka waa maalinta Nasashada Ciyaartoyda.
- 7da December 2017ka waa xafladda furitaanka tartanka.

6. Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga Xukuumadda JFS waxay u Mahadcelinaysaa Hay'adda TIS+ oo naga qaabishay Diyaaradaha, Deegaanka iyo Gaadiidka Gudaha Wufuudda iyo kooxaha kubadda cagta ee Dawlad-Goboleedka iyo Gobolka Banaadir, kulankan waxaa la isla go'aansaday in Hay'adda TIS+ ay fuliso go'aankan wadajirka ah oo ku saleysan balanqaadkii horey u jiray taasoo si weyn loogu adkeenaayo.

Ugu dambeyn kulanka waxaa lagu ayiday mahadcelintii ay Dawlad-Goboleedka Jubbaland u soo jeedisay **Xildhibaan Marwa Khadiija Maxamed Diiriye**, Wasiirka Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga doowrka Hoggaamineed iyo howlkarnimo oo ay ku Hogaamineyso Isfahamka iyo Iskaashiga wada Shaqeyneyd ee u dhaxeeya Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga Federaalka, Wasaaradaha Dhallinyarada iyo Isboortiga ee Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Gobolka Banaadir.

#### WABILAAHI TAWFIIQ

Xil. Khadiija Maxamed Diriye

Wasiirka

